

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA



ولاية بونت لاند الصومالية

FAAFINTA
الرسمية

RASMIGA
الجريدة

DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA
لولاية أرض بونت الصومال

Sanadka 15-aad. Garowe August 4, 2013

Lam.8

Faafinta bil walba soo baxda

جريدة الشهرية

Qaybta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland

Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.

TUSMADA

Qaybta Koowaad

Xeerka Ansixinta Degmada cusub Dharkayngeenyo ee Gobolka Sool

Xeer

Waxba ma leh

Qeybta Saddexaad

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

Waxba ma leh

Sharci Lr 8. ee 04/08/2013, kuna saabsan Xeerka Ansixinta Degmada cusub Dharkayngeenyo ee Gobolka Sool



PUNTLAND STATE OF SOMALIA

Sharci Lr.8 ee August 4, 2013, kuna saabsan Ansixinta Xeerka Degmada cusub ee Dharkayngeenyo ee Gobolka Sool.

Madaxweynaha Dawladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dawladda Puntland qodobkiisa 80-aad;

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Puntland ee Summad XGGW/DPL/60/2013 ee 28/07/2013;

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda ay Degmadan cusubi u leedahay Dowladda Puntland.

Wuxuu soo saaray

Xeerkan soo socda:

Qodobka 1-aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Ansixinta Xeerka Degmada ee Dharkayngeenyo ee Gobolka Sool

Qodobka 2-aad


Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala keydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee DPL.

Qodobka 3-aad

Dhaqangalka Ansixinta Xeerka Degmada ee Dharkayngeenyo wuxuu noqonayaa maalinta Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda. Lagana baahiyo Idaacadaha iyo Jaraa'idka Markaa ka dib ayaa Xeerkani dhaqangelayaa, cid kastana ay waajib ku tahay inay dhawrto kuna dhaqanto.


Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud
Madaxweynaha Dawladda Puntland

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOMALIYA
GOLAHA WAKIILADA



ولاية بنت لاند الصومال
مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Ref:- XGGW/DPL/ 60 /2013 Garoowe, Axad Date:-28/07/2013

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeeddo:- Ansixin Degmo

Guddoomiyaha Golaha Wakiilladdu:-

MARKUU ARKAY:-

Dastuurka DPL Qodobkiisa 64-aad

MARKUU ARKAY:-

Soo gudbinta Madaxweynaha Ref
MW/DPS/187/2013 ee July
28.2013 kuna saabsan Ansixinta
Degmada Cusub ee Dharkayngeenyo.

MARKUU TIXGELIYEEY:-

Baahida loo qabo Ansixinta Degmadan
Cusub

MARKUU DHEGAYSTAY:-

Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada.

WUXUU GUDDOOMIYEEY:-

Ansixinta Degmada cusub ee Dharkayngeenyo ee ka tirsan Gobolka Sool


Allaa Mahad Leh

Cabdirashiid Maxamed Xirsi
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

Golaha Wakiillada DPL



DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
MADAXWEYNAHA



ولاية بونت لاند الصومالية
الرئاسة
مكتب الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
THE PRESIDENT OFFICE

Ref: MW/DPS/187/2013

Garowe - جروي

July 28, 2013

Ku: Guddoomiyaha Golaha Wakiilladda
Mudane, Cabdirashid Maxamed Xirsi

Ujeedo: Ansixinta Degmada cusub ee Dharkayngenyo

Mudane Guddoomiye,

Anigoo tixraacaya go'aanka Golaha Xukuumadda ee Sabti,
27/7/2013 uu ku ansixiyey degmada cusub ee Dharkayngenyo oo
ka tirsan Gobolka Sool. Sidaas darteed
waxaan Golaha Wakiillada ka codsanayaa inay Degmadan
ansixiyaan.

Wada shaqayn wacan

Dr. Cabdiraxmaan Maxamed Maxamuud
Madaxweynaha Dawladda Puntland

